

Macluumaad muhiim ah oo ku saabsan isbedellada lagu sameeyay xeerarka socdaalka ee ku saabsan dheefaha dadweynaha

Dowladda federaalka waxaa ay soo gebobageysay xeerka “mas’uuliyadda guud” ee saameyn kara arjiyada dal-ku-galka ee muhaajiriinta, degenaanshaha joogtada ah, ama gelitaanka Mareykanka haddii ay qaataan dheefo dadweyne. Maxkamadda Sare ee Mareykanka ayaa oggolaatay xeerka in la hirgeliyo, oo Adeegyada Socdaalka iyo Muwaadinimada Mareykanka (USCIS) ayaa hirgelin doona xeerka cusub marka ay taariikhdu tahay Febraayo 24, 2020. Waxaan dib-u-eegnay xeerka waxaanna doonaynaa in aynu bixino macluumaad sax ah, la isku halleyn karo ee loogu talagalay shakhsiyaadka iyo qoysaska laga yaabo in uu saameyn ku yeesho.

- Barnaamijyada iyo adeegyada laga maamulo ama laga bixiyo Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada ee Gobolka Washington waa ay jiri doonaan waxaanna heli kara dadka xaqa u leh.
- DSHS waxaa ay sii wadaysaa in ay ilaaliso sir ahaanta macluumaadka shakhsiyeed ee macamiilka mana la wadaagayso macluumaadkan qofkale aan ka ahayn haddii loogu baahdo sharciga gobolka ama federaalka mooyee.
- Mas’uuliyadda guud laguma dabakhayo dadka soo-galootiga oo dhan. Qoys kasta waa uu kala duwan yahay dadkuna waa in ay doortaan dookha u wanaagsan iyaga iyo qoysaskooda, oo ku saleysan xaaladooda gaarka ah.
 - Iyada ma saameyneyso dadka sida sharciga ah ku deggan (“haystayaasha kaarka cagaarran ‘green card’”) ee codsanaya muwaadinimada ama jinsiyadda Mareykanka.
 - Iyada ma saameyneyso dadka qaxootiga ah iyo magan-galyo doonka ah, Soo-galootiga Aasiyaanka Maraykanka (Amerasian), Soo-galootiga Gaarka ah ee Ciraaqiyaanta iyo Afgaanistaanka ah ee Haysta Fiisaha Dal-ku-galka, Dadka ka soo gala Kuubo/Hayiti, dadka xuquuqaha aadanaha u dooda ee lagu sii daayay si shardi ku xiran ama siideyn sharafeed, dhibanayaasha ka ganacsiga bani'aadamka (Fiisada-T), dhibanayaasha hawl dembiyeed (Fiisada-U), Soo-galootiga Dhallinyarada Gaarka ah ama VAWA (Falka Tacadiyadda Ka Dhanka ah Haweenka) codsabayaasha iskooda u soo codsada.
 - Iyada ma saameyneyso kuwa codsanaya deganaanshaha joogtada ah ee sharciga ah (“kaararka cagaaran ‘green cards’”) ama gelitaanka Mareykanka — oo ay ku jiraan muhaajiriinta dal-ku-galka kala duwanaanshaha iyo codsiyada dib-u-cusboonaysiinta, beddelka ama muddo kororsiga dal-ku-gallada Mareykanka.

- Dheefo dadweyne badan ayaan qayb ka ahayn xeerka cusub. Qoysaska waa in ay raaxo ku dareemaan sii wadashada isticmaalka dheefaha ay xagga u leeyihiin si aannu saameyn ugu yeelan xeerka cusub.
 - Xeerka cusub waxaa uu tixgelin doonaa barnaamijyada gargaarka, cusbitaal-dhigidda ama dhibaataada caafimaad ee muddada dheer, iyo qaar ka mid ah dheefaha daryeelka caafimaad, nafaqada, iyo guryeynta ee federaalka. Hadaad rabto liiska dheefaha oo dhan, eeg Su'aalaha Inta Badan La Iswayddiyo.
 - Xeerka cusub ma tixgelin doono dheefaha kale ee federaalka. Waxaa ka mid ah WIC, CHIP, qadada iskuulka, bankiyada cuntadam hoyga, iyo kuwo kaloo badan.
 - Wax isbeddel ah laguma sameyn dheefaha aan kaashka ahayn ee dowladda hoose iyo kuwa gobolka.
- Xeerka waxaa lagu dabakhi doonaa codsiyada wax-ka-beddelka xaaladda, kordhinnada muddada joogitaanka, ama deganaanshaha joogtada ah loo shaabadeeyay Febraayo 24, 2020 ama ka-dib.
- Xeerka wuxuu tixgelin doonaa dheefaha la helay Febraayo 24, 2020 ama ka-dib. Wakhti hore looma adeegsan karo oo ma tixgelin karo dheefaha la qaatey ka hor taariikhdan.
- Ma xisaabiyo isticmaalka dheefaha ee xubnaha qoyska ee qofka. Istimaalida dheefaha ee carruurta ama xubno kale oo qoyska ah ma ahaan doonto mid loo xisaabo si lid ku ah qofka codsanaya deganaanshaha joogtada ah ama soo gelida Waddanka Maraykanka.

Dadka qabba su'aalooyin ama walaaca khuseeya saamaynta isticmaalida dheefaha dadweynaha ee ku saabsan xaaladooda socdaal waa in ay la soo xiriiraan qareenka socdaalka. Xogaga waxaa laga heli karaa tooska mid ka mid ah ururrada lagu qoray bogga internetka ee Guddoomiyaha gobolka: <https://www.governor.wa.gov/issues/issues/safe-communities/immigration-and-refugee-resources>.

Intaas waxaa sii dheer, waxaad la xiriiri kartaa mid ka mid ah ururadan soo socda si aad u heshid caawimaad:

- Khatka tooska ah ee CLEAR: 1-888-201-1014
- Mashruuca Xuquuqaha Soo-galootiga ee Waqooyi-galbeed (NWIRP):
 - Xafiska Seattle ee NWIRP: 206-587-4009
 - Xafiska NWIRP Yakima Valley (Granger): 509-854-2100
 - Xafiska NWIRP Wenatchee: 509-570-0054